

## Guriga wax ku barashada lacala haddii dugsiyada la xiro

### Ku taageerida ilmahaaga guriga wax ku barashada

#### Masuuliyada waalidka inta lagu jiro wax ku barashada fogaanta

Ka sii taageero ilmahaaga ah adoo:

- dejinaya waxyalo joogta ah iyo waxyaalaha laga filayo
- u sameynaya meel gaar ah oo uu ilmahaagu ku shaqeeyo
- la socoshada xiriirka macaliinta ilmahaaga
- ku bilaabida iyo dhammeynta maalin kasta adoo wax ka weydiinaya ilmahaaga waxbarashadiisa
- ka qaadashada door firfircoon ka caawinta carruurtaada waxbarashadooda
- dhiirigelinta nashaadka jireed iyo/ama jimicsi
- xasuusadka in ilmahaaga laga yaabo inuu culeys saaran yahay ama welwelsan yahay wakhtigan inta lagu jiro
- la socodka wakhtiga ilmahaagu uu ku qaato internetka
- ku ilaalinta in carruurtaadu noqdaan bulshaawiyiin, laakiinse uga dejinta xeerar dhiegalkooda warbaahinta bulshada.

#### Masuuliyada ardeyga inta lagu jiro wax ku barashada fogaanta

Masuuliyadaan waa in loo habeeyaa iyadoo loo eegayo da'da ilmahaaga:

- dejinta iyo/ama raacida hawl maalmeed loogu talagalay waxbarashada
- ka shaqeynta meel degan, raaxo leh oo ammaana gurigaaga dhexdiisana ah oo iyaga si gaar ah loogu sameyey
- si joogta ah ula socodka xiriirka iyo golayaasha interneetka ah wixii natijo celin ah iyo ogeysiisaya macalimiinta ka yimid
- u dhammeystirka hawlahaa si daacad ah iyo sameyntooda shaqada ugu fiican
- sameynta sida ugu fiican si ay u fuliyaan wakhtiga, waxa iyaga ka go'an iyo taariikhaha la doonayo
- la xiriiraya macalimiintooda haddii aysan fulin karayn wakhtigii loogu talagalay ama ay u baahan yihiin taageero dheeraad ah
- iska kaashiga iyo taageerada waxbarashada ardeyda kale ee aad isku fasalka tiiin
- ka raacida wasaaradda [Student use of digital devices and online services](#) (Qorshaha adeegyada online ka ah iyo qalabtka dhijitaalka ah ee isticmaalka ardeyda)
- la xiriirida shaqaalaha dugsiga marka baahiyoo kala duwan ay soo baxaan.

## **Qorsheynta ilmahaaga maalintiisa**

Dugsigaagu waa inuu siiyaa ilmahaaga jadwal ama qorshe wixii waxbarashadooda ah. Tan waxaa ka mid noqon doona bareegyo joogta ah oo waxqabad, cunteyn ama wax cabid. Waxqabadka bareegyadiisa waa muhiim in ardeydu ay kacaan oo dhaqdhaqaqaan.

Haddii aad degan tahay guri gaara, ka dib waa ammaan in ilmahaagu dibeda u baxo iyo jardiinka, balakoonka ama daarada hore.

## **FiyooBaanta**

Ku xirnaanta guriga xili wakhti dheer ah wuxuu sababi karaa caddaadis iyo isafgaranwaa. Tallooyinka sidii aad carruurtaada u xannaaneynaysid inta lagu jiro isfaquuqidaan waxaa ka mid ah:

- kala hadlida qoyskaaga oo dhan wixii ku saabsan caabuqa- fahmida xaalada waxay yareynsaa walaaca
- ka caawinta carruurtaada inay ka fekeraan wax ku saabsan sidii ay ula qabsadeen xaaladaha adag hadda ka hor iyo dib ugu xaqijijinta inay xaaladaan laftigeeda la qabsan doonaan
- xusuusinta in faquuqidaani aysan wakhti dheer jiri doonin
- u jimicsiga si joogta ah – jimicsigu waa daaweynta la xaqijiyey ee caddaadis ka iyo niyad jabka
- ku dhiirigelinta carruurtaada inay taleefan, iimeyl ama warbaahinta bulshada kula xirnaadaan xubnaha qoyska iyo saaxiibada (meeshii ay ku haboon tahay).

## **La xiriirida**

### **La xiriirida ilmahaaga**

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad ku bilowdid oo aad ku dhammeysid maalin kasta su'aalo sahlan oo yar oo ku saabsan ilmahaaga waxbarashadiisa si aad uga caawisid inay maalintooda qorsheeyaan. Ardeydo dhammi si hagaagsan wax uguma bartaan jewiga fog wax ku barashada; qaar waxay ku dhibtoodaan madax bannaanida ama qorshe la'aanta su'aalahaaguna waxay ka caawin doonaan inay wadada ku jiheeyaan.

### **La xiriirida dugsiga**

Waa inaad hubisaa inaad ogtahay sida dugsiga iyo macalimiinta ilmahaagu ay kuula xiriirayaan adiga oo u eegaya wadadaas si joogta ah.

Waa inaad hubisaa inaad ogtahay sidii aad ula xiriiri lahayd macalimiinta wixii taageerada waxbarashada ah iyo ciddii aad kala xiriiri lahayd taagerada farsamo haddii dugsigaagu doorto inay u isticmaamaalaan qalabka interneetka dhijiitaal ka ah ka qayb ahaan qorshaha waxbarashada fogaanta.

Xaaladaani waxay noqoneysaa mid ku cusub qoysaska iyo dugsiyada. Dugsiyadu waxay iskudeyi doonaan inay u hawl galaan si wareeg leh hagaajin joogta ah iyo sii fiicneyntiisa oo ku saleysan natijo celin sidaas daraadeed waxaa laga yaabaa inay ku weydiyaan adiga iyo ilmahaagaba natijo celin ah sida nidaamku u shaqeeynayo.

Dugsiyada badidoodu haddaba waa isticmaalaan nooc shabakad ay kula xiriiraan waalidiinta iyo ardeyda. Shabakadahaan jira waa in loo sii wadaa in la isticmaalo mar allaale markii suurto gal ah.

### **La xiriirida macalimiinta**

Macalimiinta waxaa laga yaabaa inay leeyihin wakhti go'an oo ardeydu ay kula hadli karaan internetka, kuna soo gudbin karaan casharo fiidyow ah ama marka doorashooyinka dhijitaalku aysan suurtagalka ahayn waxaa laga yaabaa inay leeyihin wakhti aad dejisay oo ay ilmahaaga taleefanka ku soo wacaan.

Waa kuu muhiim adiga iyo ilmahaagu inaad xasuusataan in macalimiinta ay la xiriiri doonaan qoysas kale oo fara badan, sidaa daraadeed xiriirkagu waa inuu ahaadaa mid muhiim ah oo gaaban. Waxaa laga yaabaa sidoo kale inaad xasuusid ilmahaaga inuu samro markuu sugayo wixii taageero ah ama natijo celin ah.

## Isticmaalida tignoolajiyada

Waxaa si xoogan lagugula talinaya in waalidiintu aysan ka iibsan software adeeg bixiyayaasha kale xaaladaan iyagoo uga jawaabaya ilaa inuu si khaas ah kula taliyo dugsigu mooyee.

Dugsigaaga iyo wasaaraddu waxay leeyihii qalab iyo software aad u fara badan oo la helayo kuwaasna si khaas ah ayaa loo doortay si ay u siiyan taageerada ilmahaagu uu u baahan yahay.

- Google Apps for Education - Online Google apps.  
Wixii ah isticmaalka ardeyga gal: Students portal>Learning>G Suite.
- Office 365 – online Office apps.
- Microsoft Office 365 Desktop Apps – waxaa laga yaabaa in la geliyo ilaa shan kumbiyutar ka dibna qalabka taleefanka gacanta. Dooro ‘Install Office’ xiriirka.
- Ardeydu waxay sidoo kale isticmaali karaan oo dheeraad ah software ka Adobe bilaash ah wixii ah qalabkooda ardeydu Bring your own device (BYOD) software website.

## Isticmaalida qalabka dhijitaalka iyo interneetka

Qorshaha wasaaradda ee la xiriira tignoolajiyada, qalabka iyo interneetka waxaa laga helayaa meelaha soo socda.

[Student use of digital devices and online services policy](#) (Qorshaha adeegyada online ka ah iyo qalabka dhijitaalka ah ee isticmaalka ardeyda)

Haddii ilmahaagu uu isticmaalayo macluumaadka dhijitaalka ka qayb ahaan waxbarashadooda oo aysan hubin sidii ay u sameyn lahaayeen waa inay la xiriiraan macalimkooda fasalka wixii taageero ah.

## Maareynta wakhtiga shaashada

Waxaa jirta xadadnaan ku saabsan wakhtiga qof waliba uu ku qaadanayo online, laakiinse qadarka iyo xeerarka wakhtiga shaashada waxay ku kala duwan yahay da'da.

Ku wada hadalka fiidyowga iyo isdhexgalka bulsho adoo isticmaalaya fiidyow lagu xisaabinayo wakhtiga shaashada.

Wakhtiyadaan shaashada lagu talinayo ee soo socda (iyadoo laga saarayo fiidyow ku wadahadalka) waxay ku saleysan yihiin waxyaalaha lagu talinayo oo ka yimid Akadeemiyada dhakhaatiirta carruurta ee Mareykanka:

- Da'a 2-5: 1 saac, oo loogu qaybiyo kulamo ugu badnaan ah 30 daqiqo.
- Da'da 6 jir iyo ka weyn: ma laha wax xad ah wakhtiga shaashada oo khaas ah, laakiin wakhtiga shaashada waa inuusan saameyn nashaadka jireed iyo isdhexgalka weji wejiga ah ee guriga iyo dugsiga (meeshii suurtagal ah). Waa muhiim inuu waafaqsan yahay xaddadka wakhtigaaga shaashada.

Waa inaad hubisaa in nashaadka aan dugsiga ahayni ay ku xaddidan yihiin intay le'ekaanayaan.

## Maareynta dabeecada

Inkastoo ilmahaagu uu guriga joogo weli waxay u baahan yihiin inay raacaan qorshaha maareyntaa dabeecada dugsigooda.

Iskaashiga, shaqo kooxeedka iyo natiijo celinta jiilka isku da'da ah inta lagu jiro fogaan wax ku barashada waxay u baahan doontaa in ardeyda ku xiriiraan online oo ay ku wada shaqeeyaan meelaha dhijitaalka waxa laga filayo ilmahaaga dabeecadiisa waxay la mid noqoneysaa ta casharka weji weji marka loo wada joogay.

## Adeegga Turjumaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac maamulaha dugsigaaga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiintaada fadlan ka wac Adeegga Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjumaan luuqadaada. Adeeggan wuxuu noqonayaa mid bilaash kuu ah adiga.